**Seattle Office of Labor Standards**

# Domestic Workers Ordinance

## Ogaysiiska Xaquuqaha iyo Xogta Mushaarka ee Naqshada 2024

Dadka shaqaale u qorta ama mushaar ku baxsha adeegyada shaqaale guri oo ku jira Domestic Workers Ordinance (Xeerka Shaqaalaha Guriga) ayaa lagu boorinayaa inay ogaysiiska noocaan oo kale ah siiyaan shaqaalahooda, ayagoo ku qoraaya luuqada shaqaaluhu uu kalsooni badan ku qabo adeegsigeeda. Ogaysiiskaan looguma talagelin inuu noqdo talo sharci mana abuuraayo heshiis lala galaayo Magaalada Seattle.

TAARIIKHDA OGEYSIINTA ____/____/____ MAGACA SHAQAALAHA ______________________

MAGACA SHIRKADA SHAQADA SIINAYSA ______________ TALEEFANKA AMA IIMEELKA SHIRKADA SHAQADA BIXINAYSA______________

CIWAANKA SHIRKADA SHAQADA BIXINAYSA ______________________

## XAQA MUSHAARKA UGU HOOSEEYA

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho ugu yaraan mushaarka ugu yar ee Seattle. Qiimaha mushaarkaaga saacadlaha ah waa: $_________ / saacadii.

Waxaa mushaarka lagu siinayaa: ______________________
(tusaale, dhammaadka maalin kasta oo shaqo, Jimce Kasta, 2 dii asbuucba mar maalinta Salaasada ah, iwm.)

| 2024 MUSHAARKA UGU HOOSEEYA EE SAACADLAHA AH | Mushaarka ugu hooseeya | Haddii shaqaaluhu helo $2.72/saacadii oo mushaar ah** ama gunnooyinka caafimaadka ee shirkada loo shaqeeyo bixiso |
|---|---|---|
| Inta badan shirkada shaqaalaha qorta | $19.97/saacadii | $17.25/saacadii |
| Shirkad ay u shaqeeyaan 501+ shaqaale | $19.97/saacadii | |

** Haddii aad tahay shaqaale, shirkada aad u shaqayso waa inay ku siisaa xog ku saabsan xeerkeeda mushaarka.

Fiiri haddii uu lifaaqa ku jiro ☐

### U qalmida Saacadaha shaqada dheeriga ah: Tigsaar meesha ku haboon

☐ Uma qalantid shaqaynta waqti dheeraad ah.

☐ Waxaad tahay shaqaale "u qalma shaqada waqtiga dheeraadka ah", macnaheeduna yahay inaad xaq u leedahay1.5x qiimo ka badan qiimaha mushaarkaaga caadiga ah ee saacadaha aad shaqaysay in ka badan 40 asbuuca shaqada.

## XAQA AAD U LEEDAHAY BAREEGYADA NASIINADA AH

Afartii saac oo kasta oo aad u shaqayso hal shirkad oo aad shaqaale u tahay, waxaad xaq u leedahay nasiino mushaar leh, oon la carqaladayn oo 10 daqiiqo ah dhammaadka shaqada saacada sadexaad.

### Bareegyada Nasiinada ah: Tigsaar meesha ku haboon

☐ Waxaad awoodi doontaa inaad qaadato nasiino mushaar aad ku helayso, oo aan la carqaladayn.

☐ Waxaad awoodi doontaa inaad bareeg nasiino ah qaadato intaad joogto goobta shaqada waxaana lagaa doonayaa inaad ku laabato shaqada marka laguu yeero. Haddii aad masuul ka tahay caafimaadka iyo badqabka qof aad daryeesho, waxaad waayi kartaa nasiinada sabab la xariirta masuuliyadaha ku saaran. Markay sidaas dhacdo, waxaa mushaar lagugu siin doonaa 10 daqiiqo oo dheeraad ah, ama $__________, oo aad ku helayso bareeg kasta oo nasiino ood haleeli wayday.

☐ Waajibaadkaaga ayaa ka dhigaaya wax aan suuragalayn inaad qaadato nasiino aan la carqaladayn adoon khatar gelin caafimaadka iyo badqabka dadka aad daryeesho. Waxaad heli doontaa mushaarka 10 daqiiqo ee dheeraad ah, ama $__________, afartii saacadood kasta oo aad shaqayso.

**SHURUUDAHA BAREEGA NASIINADA AH:**

- Fasaxaan waa inuu kuu sahlaa inaad nasato aadna samayso dookhyo kale oo shaqsi ah oo ku aadan waxa aad ku qabanayso waqtigaaga.
- Waxaa lagaa codsan karaa inaadan ka bixin goobta shaqada aadna ku laabato shaqada marka laguu yeero, haddii kale waxaa lagaa cayrin doono shaqada.
- Haddii nasiinadaada ay carqalad uga timaado qofka aad u shaqayso ama shaqooyinka shaqada, nasiinada ayaa dib u bilaabanaysa ilaa aad qaadato nasiino 10 daqiiqo oo xariir ah.

*Ogoow: Shaqaalaha sida tooska ah ay u shaqaalaysiiso shirkada ayaa xaq u lahaan kara heerarka shaqaalaha ee maxaliga ah iyo kuwa gobalka oo dheeraad ah, ayna ku jiraan Mushaarka la siiyo Markuu cudur la maqan yahay iyo Waqtiga Badqabka.Xog badan oo ku saabsan xaquuqda shaqaalaha waxaa laga heli karaa barta www.seattle.gov/laborstandards..

## XAQA AAD U LEEDAHAY WAQTIYADA CUNTADA

Shantii saac oo kasta oo aad u shaqayso hal shirkad ood shaqaale u tahay, waxaad xaq u leedahay waqtiga cunta oo 30 daqiiqo ah oo aan la carqaladaynta dhammaadka saacada shanaad.

### Waqtiga Cuntada: Tigsaar meesha ku haboon

- [ ] Inta lagu jiro xiliga aad cuntaynayso, waxaa si buuxda lagaaga dhaafayaa waajibaadka shaqada. Waxaad heli doontaa xiliga cunto cunista oo aadan mushaar ku helayn. Waad iska dhaafi kartaa muddada cunto cunista ee aan mushaarka lagu bixin. Ka fiiri bokiska geeska shuruudaha shardi dhaafka.
- [ ] Inta lagu jiro muddada aad cuntaynayso, waxaa lagaa doonayaa inaad ku sugnaato goobta shaqada aadna ku laabato shaqada marka laguu yeero, laakiin haddii kale lagaa dhaafo waajibaadka shaqada. Waxaad heli doontaa waqtiga cuntada oo mushaar lagu bixiyo. Meesha kama saari kartid waqtigaan cuntada ee mushaarka lagu qaato.
- [ ] Waxaad masuul ka tahay caafimaadka iyo badqabka qof qoyskaaga kamid ah, laakiin waad awoodi kartaa inaad hesho waqtiga cuntada oo mushaar leh. Maalmaha aad waydo waqtigaaga cuntada sabab la xariirta shaqooyinkaaga, waa qasab in laguugu magaa mushaarka dheeraadka ah oo 30 daqiiqo ah, ama $___________, oo aad ku helayso waqti kasta oo cunto ood wayday.
- [ ] Waajibaadkaaga ayaa kugu adkaynaaya ama kuu suurtagelin karin inaad qaadato waqtiga cuntada oon la carqaladayn adoon khatar gelin caafimaadka iyo badqabka dadka aad daryeesho. Waxaa lagu siin doonaa mushaarka 30 daqiiqo oo dheeraad ah, ama $____________, shantii saacdood kasta ood shaqayso.

### SHURUUDAHA WAQTIYADA CUNTADA:

- Waqtigaan cuntadu waa inuu kuu sahlaa inaad nasato aadna samayso dookhyo kale oo shaqsi ah oo ku aadan waxa aad ku qabanayso waqtigaaga.
- Haddii waqtigaaga cuntada uu carqaladeeyo loo shaqeeyahaaga ama hawlaha shaqada, Waqtiga cuntada ayaa dib u bilaabanaaya ilaa aad ka heli karto nasiinada 30 daqiiqo oo xariir ah.

### ISKA DHAAFIDA WAQTIGA CUNTADAAMA MAALINTA NASIINADA?

- Shardi dhaafkaan waa inuu noqdaa mid ikhtiyaari ah oo maslaxad u ah shaqaalaha.
- Waa qasab in laguu sheego xaquuqda aad iska dhaafayso iyo cawaaqibyada ka dhalan kara dhaafida.
- Shardi dhaafkaagu waa inuu sheegaa Xiliyada shardi dhaafku dhaqan galaayo.
- Waxaad xaq u leedahay inaad ka laabato shardi dhaafkaan markaad doonto.

## XAQA AAD U LEEDAHAY NASIINADA MAALINTA

Haddii aad shaqayso 6 maalmood oo toos ah, aadna ku nooshahay ama seexato goobtaada shaqada, waxaad xaq u leedahay muddada nasiinada, bilaa mushaarka ah oo 24 saac ah.

- Cadad kasta oo shaqo oo la sameeyo mudada 24 saac ah dhexdeeda ayaa loo aqoonsanayaa maalin shaqo.
- Inta lagu jiro mudadaan nasiinada ee 24 saac ah waa in si buuxda lagaaga dhaafaa waajibaadka shaqada, aan lagugu qasbin inaad goobta shaqada joogto, aana lagaa doonin inaad shaqada ku laabato marka laguu yeero.
- Waad iska dhaafi kartaa nasiinada maalinta. Ka fiiri bokiska geeska shuruudaha shardi dhaafka.

## XAQA AAD U LEEDAHAY DUKUMIINTIYADA SHAQSIGA AH

Waxaad xaq u leedahay inaad haysato dukumiintiyadaada orijinaalka ah iyo agabkaaga shaqsiga ah.

## AARGOOSIGU WAA MAMNUUC

Waxaad xaq u leedahay inaan lagaa aargoosan. Mamnuuc ayay ka tahay shirkadaha loo shaqeeyo inay qaadaan tallaabo hordhac ah (tusaale ahaan ceyrinta, dhaqaajinta, iyo hanjabaad ku sameynta ee ku wargelinta heerka socdaalka) ee ka soo horjeedo qof walba ee ku dhaqmayo xaquuqaha lagu illaaliyay Seattle Labor Standards (Hererarka Shaqada Seattle).

## MA QABTAA SU'AALO AMA CABASHOOYIN?

Si aad u waydiiso ama u gudbiso cabasho, la xariir:
**Seattle Office of Labor Standards (Xeerarka Xafiiska Shaqada ee Seattle) (206) 256-5297**
ama booqo www.seattle.gov/laborstandards.

Adeegyada xafiisku waa bilaash.
Wuxuu ku siinayaa turjumaada luuqada oo bilaash ah.
Marna kuma waydiinaayo aqoonsigaaga soo galootinimada.

## DIFAACA XAQUUQAHA MADANIGA AH

Shaqaalaha Guriga ayaa sidoo kale xaq u leh inaan lagula kicin dhibaatayn galmo, aargoosi iyo takoor sida ku cad Sharciga Seattle's Fair Employment Practices Law (Xeerarka Shaqada Cadaalada ah ee Seattle).

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaan, la xariir:
**Seattle Office for Civil Rights (Xafiiska Xaquuqaha Madaniga ah ee Seattle) oo aad ka wacayso (206) 684-4500**
ama booqo www.seattle.gov/civilrights.